

## Waa maxay ELPA21?

Imtixaanka Heerka Luqada Ingiriiska ee qarniga 21<sup>aad</sup> (ELPA21) waxaa lagu cabiraa heerka akhris, qorid, hadal, maqal iyo fahamka luqada ingiriiska. ELPA21 waxay aqoonta u qeexdaa awooda isticmaalka luqada ingiriiska si loogu gudbiyo fikir, aqoon iyo war. Imtixaankani wuxuu ku salaysan yahay heerka aqoonta luqada ingiriiska, kaas oo loo qorsheeyey in lagu daboolo baahida luqada ee ardayda si ay ugu najaxaan dugsiga iyo wixii dhaafsan.



## Waa maxay heerarka ELP?

Heerarka 10 ELP waxaa lagu qeexaa xirfada luqada ingiriisiga ee uu ardaygu leeyahay fasal kasta. Waxa laga weecdaa in la fiiriyo luqada kaliya waxaana la fiiriyaa xirfada luqada ee ilmuhu u baahan yahay si uu manhajka tacliinta ugu najaxo. Heerarkan qiimaynta luqada ingiriiska waxa isticmaali doona macalimiinta si ilmaha loogu diyaariyo inuu ku najaxo luqada ingiriiska, xisaabta iyo sayniska.

## Goormuu ilmahaygu qaadanayaa ELPA21?

ELPA21 waxa sanad kasta la qaadaa horaanta gu'ga. Kala xidhiidh xildhibaanka gobolkaaga wixii warbino khaasa ah.



## Warbixino dheeraada nagala soo xidhiidh

Email: [info@elpa21.org](mailto:info@elpa21.org)  
Website: [elpa21.org](http://elpa21.org)

## ELPA21 gobolkayga

Warbixino dheeraada oo ku saabsan ELPA21 gobolkaaga, kala xidhiidh macalimka ilmahaaga ama maamulka dugsiga.

# HAGAHA QOYSKA ee ELPA21

Imtixaanka heerka aqoonta luqada ingiriiska ee qarniga 21<sup>st</sup>



 **ELPA21**  
English Language Proficiency  
Assessment for the 21<sup>st</sup> Century

## Yaa gala ELPA21?



Ardayda loo aqoonsado inay yihiin kuqo u baahan in la baro luqada (ELL) ayaa

qaadan doona imtixaankan ELPA21. Xeerka 2001 ee Dugsiyada Hoose iyo Dugsiyada Sare ayaa qasab ka dhigaya in arday kasta oo loo aqoonsado ELL laga qaado imtixiinka luqada Ingiriiska sanadkiiba hal mar. Imtixaanka ELPA21 waxaa lagu cabirayaa heerka luqada ingiriiska ee ilmahaagu ka gaadhay.

*\*Waxa la isticmaalyaa sida dawlada dhexe u qeexday "Bartaha Luqada Ingiriiska"*

## Sidee ELPA21 u caawin karaa ilmahaaga?

Ujeedada ugu wayn ee laga leeyahay imtixaankan ELPA21 waa sidii dugsiyada looga caawin lahaa siday ardayda ugu heli lahaayeen gargaarka ay u baahan yihiin. In kasta oo ELPA21 aan loo xisaabin ka qalinjabinta dugsiya sare, hadana waxay muujisaa in ardaygu helo gargaarka dheeraadka ah ee uu u baahan yahay si uu u najaxo iyo in kale.

## Sideen ilmahaaga u caawin karaa si uu ugu diyaar garoobo?

Qayb muhiima ayaad ka tahay waxbarashada ilmahaaga. Waa kuwan waxyaabaha aad qaban karto si aad ilmahaaga ugu diyaariso ELPA21:

- Fiiri [elpa21.org/field-test](http://elpa21.org/field-test) si aad u hesho imtixaan tusaale ah oo ku saabsan ELPA21 si uu ilmahaagu u ogaado nooca su'aalaha laga rabo inuu ka jawaabo.
- Kala hadan macalimka ilmahaaga si aad u ogaatid qaybta ingiriiska ee uu ilmuhu u baahan yahay inuu diirada saaro.
- U samee wakhti uu maalintii ilmuhu kuuga akhriyo buuga uu jecel yahay.



## Sideen ku ogaan karaa natijada imtixaanka ELPA21?

Dugsiya ayaa ku siin doona warbixin buuxda oo ku saabsan natijada ilmahaagu ka keenay imtixaanka ALPA21

## Muxuu ELPA21 ku kaga duwan yahay imtixaanadii hore?

ELPA21 waa imtixaan ku salaysan kombuyutar oo loogu talo galay inuu is maamulo. Waxaa ku jira su'aalo ku salaysan waxa fasalka iyo suuqa lagu barto. Hoos ka fiirso tusaale ku saabsan imtixaanka ELPA21.

Tusaale:

**Fasalka 1: Listening: Follow Instructions**

Look at this classroom. Listen to the teacher. Follow the teacher's directions. "Put the ruler on the bookshelf."



## Maxaa dhacaya marka ilmahaagu ka gudbo ELL?

Ilmahaagu dib uma galayo imtixaanka ELPA21. Waa laga joojin doonaa gargaarka luqada ingiriiska, laakiin wuxuu heli doonaa caawimo dheeraada, waxbaroshadiisana waa lala socon doonaa mudo labo sano ah.

Warbixino dheeraada  
ELPA21, fiiri [elpa21.org](http://elpa21.org)